

Sidan waa inaad samayso bilowga teermiinka

Iminka waa bilaabmaya teermin cusub oo adigaaga waalid u ah ilmo ku jira dugsiga xanaanada, dugsiga hoose-dhexe, dugsiga hoose-dhexe ee caruurta laxaadkoodu kala dhantaalanyahay iyo dugsiga sare waxaad u baahantahay inaad samayso dhowr wax si ilmahaagu u helo teermin fiican dhanka dugsiga xanaanada ama iskoolka.

1. Cusboonaysii macluumaadka halka lagaala soo xiriirayo ee ku jira adeega elaktarooniga ee Macluumaadka Xiriirka

Waxaanu u baahanahay inaan haysano macluumaadkaaga xiriirka ee saxda ah. Sidaas darteed waa inaad gasho adeega elaktarooniga ee Macluumaadka Xiriirka **Kontaktuppgifter** oo cusboonaysiid ama xaqiijisid macluumaadkaaga xiriirka. Waa muhiim inaad gasho oo cusboonaysiid ama xaqiijisid macluumaadkaaga si dugsiga xanaanada ama iskoolka ay kuula soo xiriiri karaan adiga.

Halkan ayaad ka helaysaa adeega elaktarooniga:

<https://minasidor.norrkoping.se/minasidor>

2. Oggolow heshiiska amaahda ee qalabka dijitaalka ah (dugsiga hoose-dhexe iyo dugsiga sare)

Si ilmahaagu u amaahdo kombiyuutar ama Ipad lagu isticmaalo xilliga waxbarashada waxaad markaas u baahantahay inaad akhriso oo ogolaato heshiiska amaahda ee qalabka dijitaalka ah. Tani waxaad samaynaysaa adigoo gelaya adeega elaktarooniga ee **Låneavtal digitalt verktyg**. Adigaaga leh caruur ku jirta dugsiga xanaanada ma u baahnid inaad tani samayso.

Halkan ayaad ka helaysaa adeega elaktarooniga:

<https://minasidor.norrkoping.se/minasidor>

3. Samee wargelinta raashinka gaark ah (haddii baahi jirto)

Miyaa ilmahaagu u baahanyahay raashin gaar ah? Markaasi waxaad u baahantahay inaad gasho adeega elaktarooniga ee Raashinka gaarka ah Specialkost.

Halkan ayaad ka helaysaa adeega elaktarooniga:

<https://minasidor.norrkoping.se/specialkost>

4. Codso waxbarashada luqada hooyo (dugsiga hoose-dhexe haddii loo baahanyahay)

Miyaa ilmahaagu u baahanyahay waxbarashada luqada hooyo? Waxbarashada luqada hooyo ka codso dhanka adeega elaktarooniga ee Modersmålsundervisning.

Halkan ayaad ka helaysaa adeega elaktarooniga:

<https://minasidor.norrkoping.se/modersmalsundervisning>

Akhri dheeraad ku saabsan waxbarashada luqada hooyo ee degmada Norrköping iyo waxa shuruud u ah in ilmahaaga ama adigu aad hesho waxbarashada luqada hooyo.


<https://www.norrkoping.se/skola-och-forskola/grundskola/modersmalsundervisning.html>

Sidan ayaad samaynaysaa

Gal gudaha minasidor.norrkoping.se, dhag ka sii Mina sidor oo ku gal aqoonsiga elaktarooniga sida tusaale ahaan BankID. Marka aad gasho waxaad arkaysaa adeegyada elaktarooniga ee aad u baahantahay inaad isticmaasho.



Miyaad u baahantahay inaad codsato waxbarashada luqada hooyo ama raashin gaar ah? Markaasi waxaad adeegyada elaktarooniga ah ka helaysaa halka ka hooseysa cinwaanka "Tjänster" ee qaybta wax laga doorto.



Miyaad haysaa su'aalo ama u baahantahay caawimaad?

Haddii aad u baahantahay caawimaada gelitaanka ama samaynta codsiyadaada waxaad la xiriiri kartaa Xarunta Xiriirka kana helaysid telafoonka 011-15 00 00 ama booqo Xarunta Xiriirka kuna taala Trädgårdsgatan 21 i Norrköping.

Eeg xilliyada furitaanka Xarunta Xiriirka kuna qoran bogga intarnatka ee degmada:

www.norrkoping.se/kontaktcenter

Miyaad doonaysaa inaad wax dheeraad ah ka ogaato adeegyada elaktarooniga ah?

Wixi dheeraad ah ka akhri www.norrkoping.se/terminsstart

Salaan diiran,

Degmada Norrköping